



Wargelin ku socota Ardayda wax ka baran doonta Dugsiga Benson

## Dugsiga Benson Polytechnic wuu Guurayaa



Muuqaalka cusub ee Dugsiga Benson ee dib loo cusbooneysiyeey lana furi doona dayrta 2024.

Maadaama Dugsiga Farsamada Benson dib u cusbooneysiin lagu sameynayo dhismaha hadda inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedadda waxbarashada 2021-22, 2022-2023 iyo 2023-2024. Dugsiga Benson waxa uu si ku meel gaar ah loogu rari doonaa goobta uu ku yaalo Dhismaha Marshall ee cinwaankiisu yahay 3905 SE 91st Ave. Qorshahani waa mid dhammaan barnaamijyadii dhismihii hore looga sii wadi lahaa dhismahani cusub. Waxaan ogsoonahay in isbedelkani uu raad ku yeelan karo go'aankiini ku saabsanaa in aad wax ka barataan iskuulkan. Sidaas darteed, fadlan waxaad tixgalin siisaan isbedelkani marka aad qaadaneysaan go'aanada doorashada iskuulkaaga.

### Gaadiidka tegaya Dhismaha Marshall

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay waqtigani ka baaraandegayaan sidii loo heli lahaa badiiladii gaadiidka ee lagu caawin lahaa ardayda Benson ay ku tegi lahaayeen dhismaha Marshall inta lagu gudo jiro mudadda saddex sanno ah ee dib u dhisku ka socdo iskuulkoodii. Qorshaha gaadiidku wuxuu noqon karaa mid isku ah oo ka kooban gaadiidka dadweynaha iyo addeega gaadiidka basaska iskuulada ee jaalaha ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaalada kal-guurka ee la xiriira Marshall waxa laga heli karaa bilaha soo socda halkani: <http://BensonBond.pps.net>.

### Wakhtiga loo qabtay Mashruuca

#### GU'GA 2019 - GU'AGA 2021

#### **Naqshada & Oggolaanshaha**

Qaabka ay leedahay Naqshada / Horumarinta Naqshada / Dokumentiyada Dhismaha

#### XAGAAGA 2021 - XAGAAGA 2024

#### **Dhismaha**

Ardayda iyo shaqaalaha ayaa si ku meel gaar ah u guuri doona inta uu dhismuhu socdo.

#### DAYRTA 2024

#### **Dhammeystirka dhismaha**

Dhismaha Benson ee sida buuxda loo casriyeeyay ayaa la Furayaa